

# Wasaaradda Waxbarashada ee NSW



## Arimo Maalmeedka

Imaanshaha dugsiga maalin kastaa waxay u ogolaanaysaa ilmahaaga inay aad uga faa'iidaan waxbarashadooda oo ay horumariyaan fursadahooda nololeed iyo mihnadooda shaqo.

Imaanshaha dugsiga ee joogtada ah wuxuu ka caawin karaa ilmahaaga inay balaariyaan waxbarashadooda oo ay la yeeshaan xiriir wanaagsan aradayda ay isku da'da yihiin.

Haddii aad u baahan tahay in lagaa taageero ilmahaaga imaanshihiisa dugsiga sabab kasta oo ay tahay, fadlan nala soo xiriir anaga.

Haddii aad u baahan tahay caawimaada turjumaan, fadlan wac 131 450, u sheeg xiriiriyaha luuqadaad u baahan tahay oo weydii inay dugsiga kuu wacaan. Xiriiriyaha ayaa khadka soo gelin doona turjumaan kaa caawiyo wadahadal kaaga. Adeegan wax lacag ah lagaama qaadi doono.

